XIRIIRKA KA HORTAGA BARNAAMIJKA LIGHTHOUSE AYAA SOO BANDDHIGAA

# XAQUUQAHA AADANAHA EE SHAQADA

— HAGAHA WARBIXINTA —

## "Ma garaneysaa waxa xaquuqdaada tahay?"



## YAA SHARCIYEEYA XAQUUQAHA AADANAHA?

Dastuurka Canada wuxuu u kala go'ay masuuliyada sharciga ee u dhaxeeyo dowladaha faderaalka iyo goboleedka ama dhulka.

### FEDERAALKA

Dowlada faderaalka ayaa sharciyeyso qaar ka mid ah badrooniyada iyo adeeg bixiyayaasha, sida bangiyada iyo diyaaradaha. Waxaa lagu qeexaa sida **"faderaal ahaan loo sharciyeeyay."**

**Waxaa laguugu dabooli karaa:**

XEERKA XAQUUQAHA AADANAHA KANADIYAANKA

www.laws-lois.justice.gc.ca

### GOBOLEED AMA DHUL AHAAN

Goboleedka iyo dhulalka waxay sharciyeeyaan adeeg bixiyayaasha kale oo waxay leeyihiin sharciyadooda xaquuqaha aadanaha. Sharciyada xaquuqaha aadanaha ee shaqaalaha Ontario waxay wadaagaan isku mid badan oo isku mabd'a ah. Waxay ka illaaliyaan dadka takoorida gudaha Ontario.

**Waxaa laguugu dabooli karaa:**

XEERKA XAQUUQAHA AADANAHA

www.ohrc.on.ca

## KAAS OO KU DABOOLAN?

**KU DHAWAAD SHAQAALE WALBA** waa lagu daboolaa. Si loo ogaado haddii dacwadaada ay tahay hadalka **FEDERAAL AMA GOBOLEED,** ee sarkaalka xaquuqda aadanaha. Waxay kugu aadinayaan meesha saxda ah.

## MAXAY XAQUUQAHA AADANAHA KU SHAQO LEEDAHAY SHAQADA?

- Gudaha Ontario waxaad leedahay **XAQUUQDA SHARCIGA EE ULA DHAQAN SIMMAN EE SHAQADA,** xor ka ah takoorida.
- Shaqada waxaa lagu isticmaalaa qaab aad guud u ah, oo waxaa ku jiro:
  - SHAQAALAHA
  - QANDARAASLAYAASHA MADAXA BANAAN
  - TABARUCAYAASHA
- Midowga waa urur diyaarsan ee shaqaalaha loo aasaasay illaalinta iyo kordhinta xaquuqahooda iyo xiisaha.
- **BADROONIYADA IYO URURADA** wuxuu leeyahay waajibaad wadajir ah ee lagu hubinayo in goobaha shaqada ay xor ka tahay takoorida iyo dhibaateynta.
- Qof walba wuxuu xaq u leeyahay daaweyn simman ee la xiriirto shaqada iyada oo aan jirin takoorid ama dhibaateyn sababtoo ah **jinsiga, abtirsiga, booska asalka, midibka, asalka dhalashada, muwaadinnimada, caqiiqdada, jinsiga, dooqa galmada, aqoonsiga jinsiga, muujinta jinsiga, da'da, diiwaanka xadgudubyada, heerka guurka, heerka qoyska ama curyaannimada.**

## TAKOORIDA GOOBTA SHAQADA

- Takoorida wuxuu **ULA DHAQMAYAA SI XUN QOF SABABTOO AH SABAB ILLAALSAN.** Tusaale ahaan:
  - JINSIYADA
  - CAQIIDADA (DIINTA)
  - ASALKA QOWMIYADA
  - DOOQA GALMADA
  - DA'DA
  - HEERKA GUURKA
  - CURYAANNIMADA



- Takoorida waxay leedahay **QAABAB BADAN.**
- Takoorida waxay **DIIRADA** saari kartaa hal qof, ama koox.
- Way ku **ADKAAN KARTAA IN LA ARKO AMA** laga qiib ahaado nidaamka.
- **SHARCIYADA XAQUUQAHA AADANAHA WAA DAAWEYN.** Tani waxay la micna tahay in loogu tallogalay in ay wanaajiso xaaladaha xun, ma ahan in la ciqaabo. Sharciyada waxay isku dayaan inay ka saaraan takoorida oo uga illaaliyaan waxbarida dadka iyo aasaasida wacyigelin.

**TUSAALOOYINKA TAKOORIDA:**

- Lagaaga ceyriyay shaqada sababtoo ah uur ayaad yeelatay (jinsiga)
- Lagaaga ceyriyay sababtoo ah dhaawac ayaad shaqada ku yeelatay (curyaannimada)

## DHIBAATEYNTA: DHAQANKA TAKOORIDA CAADIGA AH

**DHIBAATEYNTA WAXAY DHACDAA MARKII QOF:**

| 01 | 02 | 03 | 04 |
|---|---|---|---|
| **KUGU XADGUDBO AMA KUGU LIIDO** jir ama hadal ahaan. | **KUU HANJABAADO AMA KU CABSI GELIYO.** | Sameeyo **HADALO AAN SOO DHAWEYN LAHEYN AMA KAFTANO** ku saabsan jinsiyadaada, diinta, jinsiga, da'da, curyaannimada, iwm. | Samey **TAABASHADA JIRKA** aan muhiimka aheyn, sida taabashada, dharbaaxida, qanjaruufada ama feerka — tan sidoo kale waxay noqon kartaa weerar. |

**!** Badrooniyada ayaa masuul ka ah dhibaato walba ee goobta shaqada oo waa inay **QAADAAN TALLAABO KU HABOON** ee ka soo horjeedo shaqaale walba ee dhibaateeyay qof kale.

## CABASHO SAMEYNTA

### XADEYNTA WAQTIGA

Waa inaad ku xareysaa codsigaaga gudaha **HAL (1) SANNO** ee taariiqda ee takoorida dhacday, ama haddii ay jirtay taxanaha dhacdooyinka, ee gudaha **HAL (1) SANNO** ee dhacdada ugu dambeyso.

### HALKEE LAGU XAREYNAYO

**XEERKA XAQUUQAHA AADANAHA ONTARIO**

Cabashooyinka xaquuqaha aadanaha ee ku dhacaa hoosta xeerkaan waxaa lala xareeyaa **Maxkamada Xaquuqaha Aadanaha Ontario:**

1-866-598-0322

WWW.HRTO.CA

**XEERKA XAQUUQAHA AADANAHA KANEDIYAANKA**

Cabashooyinka xaquuqaha aadanaha ee ku dhacaa hoosta xeerkaan waxaa lagu buuxiyay **Guddoomiyaha Xaquuqaha Aadahana Kanediyaanka:**

1-888-214-1090

WWW.CHRC-CCDP.GC.CA

## WAAJIBAADKA LAGU QAABILAYO SHAQADA

Mararka qaar, badrooniyada iyo ururada waa inayq aadaan tallaabooyinka muhiimka ah ee **SUURTOGAL LOOGA DHIGAYO INAY DADKA KA SHAQEEYAAN.** Tani waxaa loo yaqaan waajibaadka lagu qaabilayo.

Waajibaadka lagu qaabilayo waa **MASUULIYADA SHARCIGA EE BADROONIYADA, SHAQAALAHA IYO URURADA.**

**WAAJIBAADKA LAGU QAABILAYO WAXAA LOOLA JEEDAA KA SAARIDA XADEYNADA KA CELIYO SHAQAALAHA KA QEYBQAADASHADA BUUXDO EE SHAQADA.**

**TUSAALOOYINKA QAABILAADKA GOOBTA SHAQADA WAXAA KU JIRO:**

| CURYAANNIMADA | UURKA | DIINTA IYO AAMINAADAHA |
|---|---|---|
| Dib u habeynta shaqada ama booska shaqada, iyo siinta tababar kale ama shaqo kale ee ku haboon shaqaalaha ee xiga dhaawaca, jirada, ama isku darka. | Bixinta nasiinyooyin dabacsan oo balaminayo booqashooyinka dhaqtarka. | U ogolaanayo shaqaalaha inuusan ka shaqeyn fasaxyada diimeedka qaar. |



LIGHTHOUSE INITIATIVE
PREVENTION LINK

PREVENTION LINK DISABILITY PREVENTION AT WORK

cope LOCAL 343

preventionlink.ca